IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

الجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 7aad — Muqdisho 30 Maarso 1979 L. 2 R. 3

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J D S

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudaheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qoritaanku F R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. - Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHAHRCI

Bogga 258

SHARCI L. 9 ee 17 Feb. 79, Sharci ku saabsan Dhismaha Akadhemiyada Cilmi Fanka iyo Suugaanta.

SHARCI L. 10 ee 4 Maarso 79, Heshiis Amaaheed dhexmaray J.D.S. Sanduuqa Ciraaq ee Horumarinta S IADACO. » 267

قانون رقم ١٠ الصادر في ٤ مارس ١٩٧٩م (اتفاق القرض المبرم بين جمهورية الصومال الديمقراطية وصندوق العراق للتنمية «سيادكو» ٢٦٨

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 19 ee 17 Febraayo 79, Xeer Nidaamiye Akadhemiyada Cilmiga Fanka iyo Suugaanta. » 269

Wakaaladda Madbacadda Qaranka — Mugdisho.

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR 11.2.79, Lumid Buug Kayd L. 11.294 ku qoran Shs. 222/= uu leeyahay Muriidi Sh. Cali Xaaji L.196

KANDALA INDUSTRIA SOMALE CONSERVIFICI & PESCA, ISKU YEERID FADHI CAADI AH IYO MID AAN CAADI AHEYN L. 197 » 277

KANDALA INDUSTRIE SOMALE CONSERVIFICI & PESCA, AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA STRAORDINARIA E ORDINARIA L. 197

SHIRKADDA KOJU

Ogeysiis isugu yeerid shir Caadi ah.-

SHIRKADDA «MORODI» S.P.A. ISKU YEERID FADHI CAADI AH IYO MID AAN CAADI AHEYN L. 198 » 278

SOCIETA'PER AZIONE «MORODI» SEDE IN MOGADISCIO, AVVISO DI CONVOCAZIONE ASSEMBLEA L. 198

HABO TONNARA DI HABO Societa' per As ioni oo isu yeerid fadhi fadhi caadi L. 198 BIS » 279

HABO TONNARA DI HABO Societa' Per ioni Avviso di Convocazione di Assemblea Ord L. 199/BIS

## QAYBTA KOOWAAD

## SHARCI

SHARCI L. 9 ee 4 Maarso '79 Sharci ku saabsan Dhismaha Akademiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Xaashiddii 1aad, 2aad iyo tii 3aad ee Kacaanka;

ISAGOO ARKAY: Sharciyada lambarradoodu yihiin 17,18,19, ee soo baxay 1da Luulyo 1976,

ISAGOO AQOONSAN: In ay tahay lagama maarmaan in la dhiso Akadamiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta si ay cilmi baaristu uga qaadato qayb wacan horumarinta dalka.

ISAGOO TIXGELINAYA: Taladii uu soo jeediyey Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

ISAGOO TIXGELINAYA: Go'aanka Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga hoos ku qoran:

### QODOBKA 1aad

### ABUURISTA AKADEMIYADA CILMIGA FANKA IYO SUUGAANTA

Waxa la abuurayaa Akadamiyada Cilmiga, Fanka & Suugaanta oo ah hay'ad Madax bannaan, hoosna imaaneysana Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare, lehna muuqaal sharciyeed (juridical personality), waxayna u hoggaansamaysaa sharcigan, xeerarka iyo nidaamyada hoose ee loo dejiyo.

### QODOBKA 2AAD

### UJEEDOOYINKA GUUD EE AKADEMIYADA

Ujeeddooyinka Akademiyadu waxa weeye:

1. In cilmi baaristii kala filiqsanayd ee dariiqooyinka kala geddisan ku habaysnayd la mideeyo lana waafajiyo himiloo-yinka iyo mabaadii'da hantiwadaagga cilmiga ah ee kacaanka iyo baahida dadka iyo dalka Soomaaliyeed

2. In la gaarsiiyo cilmi baarista heer caalami ah, si joogta ahna ay u socoto.

3. In lagu fidiyo cilmi baarista dalka, gaar ahaan xagga beeraha: bulshda; xoolaha; macdanta, daawada, fanka iyo suugaanta iyo meel kasta oo nolosha bulshada lagu horumarinaayo.

4 In caadooyin iyo dhaqan cilmi baariseed la abuuro, si sayniska iyo teknolojiyada cusubi deegaankeenna ugu barbaaraan, oo uga mid noqdaan; horumarinteennana kaalin weyn uga qaataan.

## QODOBKA 3AAD

## HAWLAHA AKADEMIYADA

Akadhemiyadu iyada oo fulinaysa ujeedooyinka lagu xusay, qodobka 2aad ee sharcigan waxa ay qabanaysaa hawlaha hoos ku qoran:-

1. Xoojinta, isku duwidda, iyo kormeerka cilmi baarista dalka ka socota ee kaalin ka qaadan karta horumarinta dhaqan dhaqaale

2. Qeexidda meelaha gaarka ah ee cilmi baarista u baahan kuwaas oo noqon kara kuwo aragti cilmi ah tijaabinaya ama kuwo faa'iido muuqata u leh horumarinta danaha Ummadda Soomaaliyeed, ama kuwo aqoon cilmi ah oo cusub ku biirinaya cilmiga guud ee adduunweynaha ama dhamaantoodba.

3. Dhiirri gelinta cilmi baarista gudaha iyo wax wadaqabsiga xarumaha cilmi baarista ee adduun weynaha.

4. Oggolaanshaha ama diidmada mashaariicda cilmi baarista ha ahaadeen kuwa hay'adaha dawladdu soo qaddimaan, kuwa shakhsiyaad gaar ahaaneed diyaariyaan ama kuwa haarayaasha ajnebiga ihi soo gudbiyaan.

5. Kala talinta dawladda mashaariicda Wasaarad kastaba sameeyso sannad walba, iyada oo waafajinaysa mashaariicda horumarinta qorshaha ugu jira, iyo guud ahaan ka faaii'daysiga aqoonta laga helo mashaariicdaa si loo kordhiyo horumarka dhaqaale, bulshanimo iyo siyaasadeed ee dalka.

6 Qarash iyo qalab u raadinta, mowduuc kasta oo cilmi baariseed oo uu Golaha Cilmi Baarista Qaranku oggolaado.

7. Abuurista xarumo cilmi baariseed markii loo baahdo.

8. Ururinta, tarjumidda madbacaynta iyo fidinta macluumaadka laga helo cilmi baarista ee lagu sameeyo dalka ama dibedda, ee ku saabsan dadka iyo dalka Soomaaliyeed.

9. Tababarka baarayaasha iyo abuuritaanka aragti iyo dhaqan cilmi baariseed.

10. Horumarinta, ururinta, habaynta, iyo fidinta suugaanta Soomaaliyeed

11. Horumarinta iyo si cilmi ah u dersidda Af-Soomaaliga.

12. Habaynta, isku dubaridka iyo horumarinta fanka Soomaaliyeed.

13. Cilmiyeenta dhaqanka Soomaaliyeed iyo fidinta intiisa wax ku oolka ah.

14. Isla kaashiga Jaamacadda Ummadda si uu u abuurmo deegaanka cilmi baariseed.

15. U fududaynta dadka garashada iyo wax ku qabsiga sayniska iyo teknoolojiyda cusub.

16. Baahinta iyo ururinta qoraallada ama magacyada qoraallada ku saabsan dalka iyo dadkaa Soomaaliyeed, iyo ururinta qoritaanka iyo cilmiyaynta hantida dabiiciga ah (all naturl resources). a

QODOBKA 4AAD

DHISMAHA AKADEMIYADA

Xubnaha talagoynta arrimaha Akadhemiyadu waxa ay ka koobnaanayaan:

1. Guddiga Hoggaaminta Cilmi Baarista
2. Golaha Cilmi Baarista.
3. Guddoonka Akademiyada
4. Guddiga fulinta sare ee Akademiyada

QODOBKA 5AAD

GUDDIGA HOGGAAMINTA CILMI BAARISTA

1. Guddiga Hoggaamintu wuxuu ka koobnaanayaa :

b) Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare Guddoomiye

t) Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta Guddoomiye ku Xigeen

j) Guddoomiyaha Akademiyada Cilmiga, Fanka & Suugaanta Xoghaye

x) Guddoomiyaha Jaamacadda Xubin

kh) Guddoomiyaha Qorshaha Qaranka, Xubin

2. Guddigu waxa uu kulmayaa ugu yaraan sannadkii laba jeer

QODOBKA 6AAD

HAWLAHA GUDDIGA HOGGAAMINTA CILMI BAARISTA

Hawlaha Guddiga Hoggaaminta Cilmi Baaristu waxa ay noqonayaan:

b) Dejinta siyaasadda Guud iyo barnaamijka Akademiyada

t) Lacag u raadinta iyo miisaaniyad siinta Akademiyada

j) Geesi gelinta iyo xaqiijnta siyaasadda iyo hawlaha Akademiyada iyo kuwa Golaha Cilmi Baarista Qaranka.

x) La socodka hawlaha cilmi baariseed ee ka kala socda hay'adaha dawladda ee kala duwan.

kh) Ka daba tegidda iyo hubinta joogtada ah ee hirgelinta barnaamijyada cilmi baarista.

d) Magacaabidda Xeeldheerayaasha Guud iyo xeeldheerayaasha Sare isagoo tixgelinaya talada Guddoomiyaha Akademiyada Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta.

QODOBKA 7aad

GOLAHA CIMI BAARISTA

1. Golaha Cilmi baaristu waxa uu ka koobnaanayaa 14 xubnood oo ka socda hay'adaha hoos ku qoran:-

Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare, Beeraha, Xoolaha, Sancada, Caafimaadka, Kalluunka, Gaadiidka Badda iyo Dekedaha: Macdanta iyo Biyaha; Maaliyadda, Waxbarashada iyo Barbaarinta, Shaqada iyo Arrimaha Bulshada,

Jaamacadda Ummadda, Qorshaha Qaranka, Machadka Maamulka Horumrinta iyo Maareynta (SIDAM).

2. Xubnaha Golaha loo magacaabayaa waa in ay ahaadaan aqoonyahanno cilmi baaristoodu siisay aqoonsi qarameed. lehna karti aqooneed muujiyeyna dadaal dheeraad ah iyo xiiso gaar ah oo ay u hayaan cilmi baarista.

3. Xubnaha Golahu waxay Akademiyada wakiil uga noqonayaan hawlaha cilmi baarista ee hay'adahooda ka socda, iyaga oo isla markaana wadaya hawlahoodii caadiga ahaa ee ay ka hayeen hay'adaha ay ka shaqeeyaan.

4. Xubnaha Golaha Cilmi Baarista Qaranka waxa la soo magacaabayaa saddexdii sannadoodba mar, haddii loo baahdana mar labaad waa loo cusboonaysiin karaa.

5. Golaha Cilmi Baarista waxa guddoomiye u noqonaya Guddoomiyaha Akademiyada, isagaana fadhiyadooda qaban qaabinaya.

QODOBKA 8AAD

1. Goluhu wuxuu ku kulmayaa xarunta Akademiyada cilmiga iyo aadaabta hawshiisuna waxay noqonaysaa:-

b) Fulinta siyaasadda iyo barnaamijka guud ee cilmi baarista dalka oo ay soo dejiyaan Guddiga Hoggaaminta Cilmi Baarista.

t) Qaban Qaabinta iyo ka baaraandegga mashaariicda cilmi Baarista.

j) Qiimaynta iyo oggolaanshaha mashaariicda cilmi baarista

x) Ka daba tegidda iyo hubinta joogtada ah ee mashaariicda cilmi baarista.

## QODBKA 9AAD

## GUDDOOMIYAHA AKADEMIYADA

1. Akademiyadu waxay yeelanaysaa Guddoomiye uu soo magacaabayo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed, isagoo tixgelinaya talada Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

2. Guddoomiyuhu waxa uu jagada haynayaa muddo (4) sano ah oo loo cusboonaysiin karo. Mushaharkiisa iyo gunnooyinka uu muddadaas qaadanaayo waxa lagu goynayaa dekreetada Madaxweynaha ee lagu magacaabayo.

3. Qofka loo magacaabayo Guddoomiyaha waa inuu leeyahay tacliin jaamacadeed ee sare iyo waaya-aragnimo cilmi baariseed.

4. Guddoomiyuhu wuxuu leeyahay awoodaha soo socda:

b) Wuxuu uga noqonayaa mas'uul Guddiga Hoggaaminta Cilmi Baarista inay Akademiyadu hawsheeda iyo ujeeddooyinkeeda si habsami ah oo sharciga waafaqsan u fuliso.

t) Wuxuu isugu yeerayaa, diyaarinayaa ajandooyinka shirarka Guddiga Hoggaaminta Cilmi Baarista, Golaha Cilmi Baarista Qaranka iyo guddiga sare ee fulinta ee Akademiyada.

j) Wuxuu masalayaa Akademiyada arrimaha la xiriira oo dhan, ama magacaabayaa ciddii kale oo beddelkiisa masali lahayd, haddaan guddiga hoggaamintu amar diidaya bixin.

x) Wuxuu ku saxiixayaa magac Akademiyada heshiisyo ay dhinac tahay isagoo oggolaanshaha Guddiga Hoggaaminta Cilmi Baarista haysta. Guddigu wuxuu oggolaanshihiisa ku bixin karaa si guud ahaaneed ama si gaar ahaaneed oo ku caddaysan warqadda uu ku bixiyey

kh) Wuxuu maamulayaa, kormeerayaa hawlaha cilmi baarista isaga oo fulinaya siyaasadda guud ee dalka, go'aannada Guddiga Hoggaaminta iyo Golaha Baarista, wuxuuna lix dii biloodba mar warbixin ku saabsan hawlaha Akademiyada u gudbinayaa Guddiga Hoggaaminta Cilmi Baarista.

d) Wuxuu ka qaadanayaa tallaabooyin arrimaha ku saabsan asluubta shaqaalaha maamulka iyo kuwa cilmi baarista haddaan tallaabooyinka noocaas ah sharciga, xeerarka iyo nidaamyada hoose cid kale awooddooda siinayn.

QODOBKA 10AAD

GUDDIGA FULINTA SARE EE AKADEMIYADA

Guddiga Fulinta Sare ee Akademiyadu waxa ay koo-an tahay:-

i) Guddoomiyaha Akademiyada

ii) Xeeldheerayaasha Guud.

iii) Afar Xeeldheere Sare

iv) Agaasimayaasha maamulka iyo ururinta iyo wax soc saarka.

v) Guddoomiyaha Unugga Xisbiga.

vi) Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha.

QODOBKA 11AAD

SHAQAALAHA CILMI BAARISTA

Jagooyinka shaqaalaha cilmi baarista waxay noqonayaan kuwa hoos ku qoran:

i) Xeeldheere Guud

ii) Xeeldheere Sare

iii) Xeeldheere

iv) Xeeldheere — Kaaliye

v) Jagooyin kale oo uu abuuro Guddiga Hoggaaminta Cilmi Baarista oo u dhigma kuwa ku sheeggan sharciyada shaqaalaha dawladda iyo Wakaaladaha madax banna-an.

QODOBKA 12AAD

MAGACAABIDDA SHAQAALAHA CILMI BAARISTA

1. Xeeldheerayaasha Guud iyo Xeeldheerayaasha Sare waxa soo magacaabaya Guddiga Hoggaaminta Cilmi Baarista iyaga oo tixgelinaya talada Guddoomiyaha Akademiyada Cilmiga, Fanka & Suugaanta.

2. Xeeldheerayaasha, iyo Xeeldheere.kaaliyayaasha waxa soo magacaabaya guddiga fulinta ee sare iyaga oo la socodsiinaya Wasiirka Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

## QODOBKA 13AAD

### MUSHAHARKA IYO GUNNOOYINKA SHAQAALAHA AKADEMIYADA.

1. Mushaharka iyo gunnooyinka xeeldheerayaasha, iyo shaqaalaha kale ee cilmi baaristu waxay ku cad yihiin xeerarka iyo nidaamyada hoose.

2. Guddiga Hoggaaminta oo Wasiirku u soo jeediyey, isagoo la tashaday Guddoomiyaha Akademiyada ayaa awood u leh, si xeerarka waafaqsan, inuu mushaarka iyo gunnooyinka ku sheeggan xubinta sare ee Qodobkan, hadba markii waqti la gaaro, fiiro lagu hagaajinayo ugu laabto.

3. Haddayan sharcigan, xeerarka iyo nidaamyada hoose wax kale sheegayn jaggooyinka mushaharooyinka iyo gunnooyinka ay qaadanayaan shaqaalaha maamulka Akadhemiyada waxa goynaya Golaha Hoggaaminta Cilmi Baarista isagoo tixgelinaya sharciga u degsan shaqaalaha Wakaaladaha madax banaan iyo ra'yiga Guddoomiyaha.

4. Shaqaalaha Cilmi baarista waxa loo jeedaa kan uu tilmaamayo Qodobka 13 ee Sharcigan.

## QODOBKA 14AAD

### HAWLGABKA IYO GUNNOOYINKA LA XIRIIRA (XAQA)

Hawlgabka iyo Gunnooyinka la xiriira shaqaalaha Akademiyada waxa lagu dhaqayaa sharciyada arrimahaas khuseeya oo lagu dhaqo shaqaalaha dawladda.

## QODOBKA 15AAD

### HAY'ADAHA AKADEMIYADU XIRIIR GAAR LA YEELANAYSO

Si ay hawsheeda si habsi ah ugu fuliso Akademiyadu waxa ay xiriir gaar ah la yeelanaysaa:-

b) Jaamacadda Ummadda

t) Qorshaha Qaranka

j) Golaha Murtida iyo madadaalada

x) Maktabadaha Qaranka

kh) Wasaaradda Waxbarashada iyo barbaarinta.

## QODOBKA 16AAD

### XUQUUQDA MADBACADAYNTA MACLUUMAADKA CILMI BAARISTA

1. Macluumaadka mashaariicda cilmi baarista ee ay Akademiyadu kharashka ka bixiso waxaa madbacayntooda xaq u leh Akademiyada oo keliya.

2. Qodobkani wax u dhimi maayo xuquuqda uu qoruhu leeyahay oo ku sheeggan sharciyada xuquuqda madbacaynta (copy right laws).

## QODOBKA 17AAD

### MAALIYADDA AKADEMIYADA

Akademiyada waxay maaliyadu u soo geli kartaa sida hoos ku qoran:-

— Kaalmo Dawladdu u fidiso

— Hibo iyo macaawimo la siiyo

— Wixii ka soo gala qoraal iyo daabacaad ay samayso.

— Deeq dawladeed oo kale, mid wakaaladeed, mid ururro caalami ah, mid ka timaadda dalal saaxiib ah hay'ado iyo dad ajnebi ah iyo hay'ado iyo dad Soomaali ah.

## QODOBKA 18AAD

### KEYDINTA MAALIYADDA

Wixii lacag Akademiyadu leedahay Agaasimaha Maamulka lacagta ayaa ku kaydinaya Bankiga J.D.S. ka furan, isaga oo Guddiga fulinta oggolaansho ka qaba.

## QODOBKA 19AAD

### QORASHO SHAQAALE QALAAD

1. Akademiyadu waxay awood u leedahay inay qorato shaqaale shisheeye ah markii ay lagama maarmaan noqoto, iyadoo la gelaysa heshiis ka dib marka la tixgeliyey xeerka lam. 33 ee 25. 12. 1968.

2. Wax allaale wixii ku saabsan waajibaadka iyo xuquuqda shaqaalaha loo qoray sida kor ku sheeggan waxaa lagu dhaqayaa heshiiskaas la kala saxiixday.

## QODOBKA 20AAD

### KA DHAAFID CASHUUR IYO WIXII LA MID AH

Iyadoo aan la burrinayn sharciyada jira oo arrintan ku saabsan Akademiyadu wax cashuur ah ama waajibaad kale kama bixinayso hantida ay soo wareegsanayso ama soo gadanayso oo sahlaysa fulinta hawlaha cilmi baarista.

## QODOBKA 21AAD

### SANNADKA MAALIYADDA

Sannadka Maaliyadu wuxuu billawdaa 1da Jannaayo, wuxuuna dhamaadaa 31ka Diisembar.

## QODOBKA 22AAD

### XARUNTA AKADEMIYADA

Xarunta Akademiyadu waxay noqonaysaa Muqdisho, hase yeeshee waxay Akademiyadu laamo ku yeelan kartaa meel kasta oo dalka gudihiisa ah markii loo baahdo, go'aankeedana waa inuu yèeshaa Guddiga Hogaaminta Cilmi Baarista.

## QODOBKA 23AAD

### XEERKA

Xeerar lagu hirgeliyo sharcigan, waxa awood u leh inuu soo saaro Madaxweynaha Jamhuuriyadda D. S. oo uu u soo jeediyo Wasiirka Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

## QODOBKA 24AAD

Hadday iskhilaafaan afafka sharcigani ku qoran yahay waxaa la raacayaa kan Soomaaliga ah.

## QODOBKA 25AAD

1. Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla marka uu saxiixo Madaxweynaha J. D. S.
2. Sharcigan waxaa lagu soo saair doonaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 17 Febraayo 1979

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA D. S.

Jaalle S/GAAS Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 10 ee 4 Maarso 79, Heshiis Amaaheed

ee dhexmaray JDS, iyo Sanduuqa Ciraaq ee Horumarinta SIDACO.

MADAXWEYNAHA
JAMHUURIYADDA DIMOQRADIGA SOOMAALIYA

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar, 1969.

ISAGOO ARKAY: Sharciyadda tirsigoodu yahay 1, 17, 18 iyo 19 ee 1dii Luuliyo, 1976.

ISAGOO ARKAY: Heshiiska Amaahda ee Shirkadda Horumarinta Beeraha SIADCO ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo SANDUUQR Ciraaq ee hormarinta Dibedda, laguna kala saxeexday Baqdaad 21kii Oktoobar, 1978.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Go'aankii Guddiga Siyaasadda Golaha Dhexe XHKS iyo Golaha Wasiiradda ee 15 2.1979. Wuxuu soo saarayaa sharci soo socda:

Qodobka 1aad

Heshiiska Amaahda ee shirkadda horumarinta beeraha beeraha SIADCO ee dhexmaray JDS iyo SANDUUQA Ciraaq ee horumarinta dibedda laguna kala saxeexday Baqdaad 21kii Oktoobar, 1978 waa la meelmariyey

Qodobka 2aad

Heshiis wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, wuxuuna u dhaqan gelidoonaa sida waafaqsan qodobkiisa 10aad.

Sharcigan waxa lagu soo saarii doonaa Faafinta Rsmiga ah ee JDS.

Muqdisho 4.3.1979

SAREEYE GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE

MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA DIMOQRADIGA SOOMAALIYA

قانون رقم ١٠ الصادر فى ٤ مارس ١٩٧٩م (اتفاق القرض المبرم بين جمهورية الصومال الديمقراطية وصندوق العراق للتنمية «سبادكو»)

وثيقة التصديق

بعد الاطلاع ، على الميثاق الاول والثانى والثالث اثورة ٢١ أكتوبر ١٩٦٩م

وبعد الاطلاع، على القوانين رقم ١، ١٧، ١٨، ١٩ الصادرة فى ١ يوليو ١٩٧٦م .

وبعد الاطلاع، على اتفاقية القرض للشركة الصومالية ــ العراقية للتنمية الزراعية «سيادكو» بين جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العراقى للتنمية الخارجية والموقع عليها فى بغداد بتاريخ ٢١ أكتوبر ١٩٧٨ .

وبعد الاطلاع، على قرار اللجنة السياسية ومجلس الوزراء بتاريخ ١٥ ــ ٢ ــ ١٩٧٩م.

يصدر القانون التالى

المادة الاولى

تم التصديق على اتفاقية القرض للشركة الصومالية ــ العراقية للتنمية الزراعية «سيادكو» بين جمهورية الصومال الديمقراطية والصندوق العراقى للتنمية الخارجية والموقع عليها فى بغداد ٣١ أكتوبر ١٩٧٨م.

المادة الثانية

تكون للاتفاقية قوة القانون فى جمهورية الصومال الديمقراطية طبقا للمادة العاشرة من الاتفاقية وستنشر فى الجريدة الرسمية للجمهورية .

فى ٤ مارس ١٩٧٩م.

بمقديشو

اللواء محمد سياد برى

رئيس جمهورية الصومال الديمقراطية

## QAYBTA LABAAD
## X E E R

XEEER MADAXWEYNAHA 19 ee 4 Maarso 79
Xeer — Nidaamiye Akademiyada Cilmiga Fanka iyo Suugaanta

MADAXWEYNAHA J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad 2aad iyo tan 3aad ee ka caanka 21ka Oktoobar 1969.

ISAGOO AQOONSAN: Baahida loo qabo in la dejiyo Xeer lagu faahfaahiyo sharciga dhismaha Akademiyada.

ISAGOO TIXGELINAYA: Taladii uu soo jeediyey Wasiirka Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka hoos ku qoran

### QODOBKA 1aad
### SHAQAALAHA AKADEMIYADA

Shaqaalaha Akadeemiyada waxa uu u qaybsamayaa :

b) Shaqaalaha Cilmiga Baarista

t) Shaqaalaha Maamulka.

### QODOBKA 2aad
### SHAQAALAHA CILMI BAARISTA

1. Jagooyinka shaqaalaha Cilmi Baarista waxa ay noqonayaan kuwa hoos ku qoran:

i) Xeeldheere Guud — ii) Xeeldheere Sare

iii) Xeeldheere — iv) Xeeldheere-Kaaliye

v) Jago kasta oo uu abuuro Guddiga Hogaaminta Cilmi Baarista, isagoo raacaya taladda Guddiga Fulinta Sare ee Akademiyada iyo tan Guddoomiyaha.

1. Magacaabidda, beddelaada iyo dallaacsiinta shqaaalaha cilmi baarista ee ku xusan xubinta hore ee qodobkan, waxa loo asmaynayaa si waafaqsan qodobka 13aad ee Sharciga Akademiyada.

2. Mushaharooyinka iyo gunnooyinka shaqaalaha cilmi baarista waa kuwa hoos ku qoran:

b) Mushaharooyinka shaqaalaha cilmi baarista waqtiga buuxa:

| Jagadda | Mushahar | Gunno | Guri | Gunno | Jago |
|---|---|---|---|---|---|
| Xeel. Kaaliye | 1,100/— | 300/— | | 400/— | — |
| Xeeldheere | 1'300/— | 500/— | | 500/— | - |
| Xeeldheere Sare | 1'500/— | 500/— | | 700/— | |
| Xeeldheere Guud | 2'200/— | 500/— | | 800/— | |

t) Mushaharka Cilmi Baarista waqtiga dhiman.

| | |
|---|---|
| Xeeldheere Kaaliye | 800/— |
| Xeeldheere | 1,1000/ |
| Xeeldheere Sare | 1'500/— |
| Xeeldheere Guud | 1'700/— |

3. Guddiga Hoggaaminta oo Wasiirku u soo jeediyey, isaga oo la tashaday Guddoomiyaha Akadamiyada, ayaa awood u leh si xeerka waafaqsan, inuu mashaharka iyo gunnooyinka ku sheegan xubinta sare ee qodobkan, haddaba markii waqti la gaaro fiiro lagu haggaajinayo ugu laabto.

QODOBKA 3aad

XULKA SHAQAALAHA CILMI BAARISTA

Qofka loo qaadanayo ama lagu soo wareejiyo inuu ku biiro shaqaalaha cilmi baarista waa in uu haystaa shahaadad Jamacadeed oo la aqoonsan yahay, heerka uu ku gudbayna uu ahaado «B» iyo wax ka sareeya, lahaado waayo aragnimo cilmi baariseed iyo wixii kale ee looga baahdo, sida ku cad qodobada soo socda.

QODOBKA 4aad

Xeeldheere guud waxa Akademiyada loogu qaadan karaa, loogu soo wareejin karaa ama loo dalacsiin karaa qofka la yimaadda shuruudaha hoos ku qoran:

1. Tacliin Jaamacadeed oo sare
2. Awood hoggaamin cilmi baariseed iyo waayo aragnimo ugu yaraan (12) sano ah.
3. Qoraallo cilmi ah oo ama:-

b) Aragti cilmi ah tijaabinaya,

l) Faa'iido muuqata u leh horumarinta danaha Ummadda Soomaaliyeed.

j) Aqoon cilmi ah oo cusub ku biirinaya cilmiga guud ee adduun weynaha.

x) Dhamaantoodba.
Qoraaladaasu waa in ay mutaysteen taxgelin qaranimo iyo aqoonsi caalami ah.

QODOBKA 5aad

XEELDHEERE SARE

Xeeldheere Sare waxa Akademiyada looga qaadan karaa. loogu soo wareejin karaa ama loo dallacsiin karaa qofka la yimaadda shuruudaha hoos ku qoran:
1. Tacliin Jaamacadeed oo sare.
2. Waayo aragnimo cilmi baariseed oo ugu yaraan «8» sano ah;
3. Qoraalo cilmi baariseed oo kasbay tixgelin qaranimo iyo aqoonsi caalami ah.

QODOBKA 6aad

XEELDHEERE

Xeeldheere waxa Akadamiyada looga qaadan karaa, loogu soo wareejin karaa ama loo dalacsiin karaa qofka la yimaadda shuruudaha hoos ku qoran:-

1. Shahaadad Jaamacaddeed oo heerkeedu ugu yaraan yahay «B» ama ka fiican.

2. Shaqo cilmi baariseed iyo «tadbiiq» cilmiyeed oo ugu yaraan «B» shan sano (5) ah.

3. Niyad iyo aragti cilmi baariseed

QODOBKA 7aad

XEELDHEERE — KAALIYE

Xeeldheere — Kaaliye waxa Akademiyada looga qaadan karaa, loogu wareejin karaa ama loo dallacsiin karaa qofka la yimaadda shuruudahan:

1. Shahaadada Jaamacadeed oo heerkeedu yahay ugu yaraan «B» ama ka fiican.

2. Niyad iyo aragti cilmi baariseed.

QODOBKA 8aad

HAWL CILMI BAARISEED OO MUDAN QADARIN DALACAAD JAGO SARE.

1. Iyada oo la dhawrayo habka qodobada Xeerkan ku sheegan qof ku guulaysta cilmi baaris qoto dheer oo ama tijaabinaysa fikrad cilmi ah oo jirta, ama faa'iido muuqata u leh horumarinta aqoonta iyo danaha Ummadda Soomaaliyeed, ama aqoon cusub ku biirinaysa cilmiga guud ee Adduunweynaha waa loo dallacsiin karaa jagada ka saraysa tan uu markaa joogo, iyadoon lagu xirin shuruudaha waaya aragnimada ee ku xusan qodobada 4aad, 5aad, iyo 6aad ee xeerkan.

2. Xubinta hore ee qodobkan waxa lagu dhaqaya cidii kasta oo la timaada hawl cilmi baariseed oo heer sare ah.

QODOBKA 9aad

XILSAAR JAGO

1. Qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha cilmi baarista waxa loogu dhiibi kara ku meel gaar ahaan jago ka sareeysa tan uu rasmi ahaan u hayo.

2. Qofka loogu dhiibo jago sida kor ku xusan, hayana muddo 30 maalmood dhaafaysa, wuxuu xaq u leeyahay bishii gunnada lagu qaato jagada cusub oo ku meel-gaarka loogu dhiibay.

QODOBKA 10AAD

Markii qof loo qaadanayo shaqaalaha cilmi baarista wuxuu geleyaa hal sano oo tijaabo ah. Hadday muddada tijaabada ah ka muuqato in qofkaas karti darro awgeed gudan kari waayo waajibaadka iyo xilka jagada la xiriira Akademiyada waxay awood u leedahay:

i) Hadduu qofku ahaa mid Akademiyadu toos u qaadatay darajadiisuna tahay:-

b) Xeeldheere — Kaaliye shaqada cilmi baarista ayaa laga beddelayaa.

t) Xeeldheere sare iyo xeeldheere guud hal darajo ayaa hoos loo celinayaa;

j) Haddii qofku yahay mid Akademiyadu loo soo wareejiyey, waxay u celinaysaa hay'addii looga soo beddelay ama Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.

2. Sannadka tijaabadu kuma jiro muddada lagu qiimaynayo qofka waaya aragnimadiisa.

QODOBKA 11aad

FASAX WAXBARASHO

1. Hadday Akademiyadu u garato cid ka mid ah shaqaalaha cilmi baarista deeq waxbarasho, si ay sare ugu dhigto heerkooda tacliimeed, waddanka gudihiisa ama dibeddiisa, waxa loo aqoonsanayaa sida uu wado shaqadii rasmiga ahayd wuxuuna xaq u leeyahay musharharka oo dhan, muddada waxbarashadiisu socoto.

2. Xubinta hore ee qodobkan waxa kale oo lagu dhaqaya cidii kasta oo loo xilsaaro hawl cilmi baariseed oo gaar ah oo safar dibeddeed u baahan karta.

QODOBKA 12aad

Kororsiimo Mushahaaro

Shaqaalaha Cilmi Baarista ee ku xusan qodobka 2aad ee xeerkan, waxay dhamaan xaq u yeelanayaan kororsiimo joogto ah oo dhan Sh. So. 50/ (konton) labadii sanaba mar ilaa 7 (toddoba) goor.

QAYBTA LABAAD

MAGACAABIDA' DALACSIINTA IYO BEDDELAADA SHAQAALAHA MAAMULKA

QODOBKA 13aad

MAGACAABIDDA SHAQAALAHA MAAMULKA

1. Qofka loo qaadanayo ama lagu soo wareejinayo shaqaale ahaan Akedemiyada waa inuu labada shuruudood ee hoos ku qoran midkood leeyahay:

b) Ugu qaraan sitaa shahaadad dugsiga sare oo ku gudbay boqolkiiba lixdan (60%);
t) Waa inuu aqoon guud oo fiican iyo karti ama waaya aragnimo dheeraad ah leeyahay.

2. Qaadashada, dallacada, casilaadda iyo beddelaada shaqaalaha maamulka waxa soo jeedinaya Guddiga Fulinta Akademiyada iyagoo kala tashanaya Wasiirka Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

QODOBKA 14aad

JAGOOYINKA, IYO MUSHAHAROOYINKA SHAQAALAHA MAAMULKA

Jagooyinka, mashaharooyinka iyo gunnooyinka ay qaadanayaa shaqaalaha maamulka Akademiyada waxa goynaya Gola-

ha Hoggaaminta Cilmi Baarista isaga oo tixgelinaya sharciga u degsan shaqaalaha Wakaaladaha madaxa banaan iyo ra'yiga Guddoomiyaha.

QODOBKA 15aad

AFKA CILMI BAARISTA

Qoraalo cilmi baaris ah waxaa lagu soo gudbin karaa afka Soomaaliga, Carabiga, Ingiriisiga iya Talyaaniga, iyadoo la tixgelinaayo afafka dadka Soomaaliyeed qoraalo cilmi ku soo bandhigi karaan.

QODOBKA 16aad

QADARINTA MAWDUUCYADA CILMI BAARISEED

Mawduucyada cilmi baarista ee loo soo qadami Galaha Cilmi Baarista Qaranka waxa lagu qadarinayaa ama lagu oggolaanaya shuruudaha soo socda.

1. Suugaanta habka cilmi baarista (Suondness of Scientific methodology employed).

2. Faa'iida ay u leedahay himilooyinka iyo danaha dadka iyo dalka Soomaaliyeed.

3. Cilmi ahaan sida ay wax ku ool u tahay (theoretical import).

4. Xaddidnaanta waqtiga ay qaadanayso.

5. Isu-dhignaanta wax tarka ay leedahay iyo qiimaha ay ku kacayso.

QODOBKA 17aad

KHARASHKA MAWAADIICDA CILMI BAARISTA

b) Kharashka mashaariicda la oggolaado sannad sannad ayaa loo gooynayaa.

t) Mashruucii sannad wax ka badan soconaya wax la qiimaynayaa wixii laga soo qabtay inta aan la oggolaan kharashka sannadka kale.

QODOBKA 18aad

SHAQAALAHA LOO XILSAARO CILMI BAARIS GAAR AHAANEED

1. Qofkii loo xilsaaro hawl cilmi baariseed oo gaar ah wax

uu xaq u leeyahay gunno dheeraad ah (Special research allowance).

2. Waxa gunnadaas dheeraadka ah goynaya Guddiga Sare ee Fulinta marka la guddoominayo gunnada la siinaya qofka as waxa la tixgelinayaa:

i) Wax tarka cilmiyeed iyo wax ku qabsashada ay leedahay cilmi baaristu.

ii) Qiimaha, culayska iyo dhiibaatooyinka la xiriira hawshaas.

QODOBKA 19aad

GUDIGA DHEXE EE ASLUUBTA AKADEMIYADA

1. Guddiga Fulinta Sare ee Akadamiyada ayaa noqonayse Guddiga Dhexe ee Asluubta shaqaalaha Akademiyada isaga ayaana awood u leh inuu dacwo asluubeed ku qaado cid kasta oo ka tirsan shaqaalaha Akademiyada.

QODOBKA 20AAD

HABKA QAADIDDA DACWADAHA ASLUUBTA EE SHAQAALAHA CILMI BAARISTA

Habka dacwadaha asluubta loogu qaadayaa xubnaha shaqaalaha cilmi baarista ee Akademiyada wuxuu u bilaabmayaa sida soo socota:

Hadday dacwadu ku jeeddo:

b) Xeeldheere Guud waxa ku oogi kara Guddoomiyaha iyadoon cidna ku dhalin, amase iyadoo uu raacayo talo ay soo jeediyeen xeeldheerayaasha machadkiisa, Guddiga Fulinta Sare, ama Guddoomiyaha Guddiga Hoggaaminta Cilmi Baarista.

t) Xeeldheereyaasha sare ama shaqaalaha cilmi baarista waxa ku oogi karaa guddiga Fulinta Sare ama xeeldheeraha Guud.

j) Agaasimaha Maamulka iyo Agaasimaha Ururinta iyo wax soo saarka waxa ku oogi kara Guddoomiyaha Akademiyada iyo Guddoomiyaha Guddiga Sre ee Hoggaaminta Cilmi Baarista.

x) Xubin kasta oo kale oo ka mid ah shaqaalaha Akademiyada waxa ku oogi kara Guddoomiyaha Akademiyada isagoo raacaya tallada madaxda qaybaha uu ka tirsan yahay haddaan xeerka iyo nidaamyada hoose si kale qabin.

QODOBKA 21aad

GO'AANKA GUDDIGA DHEXE EE ASLUUBTA

Go'aanka guddiga Dhexe ee Asluubta oo ku saabsan dacwooyinka shaqaalaha Akademiyada waa kama dambeys. Xeel dheeraha Sare, iyo Xeeldheeraha Guud waxa u furan cabasho ay u jeedin karaan Guddiga Hoggaaminta Cilmi Baarista oo talaabo ugu dambaysa ka qaadanaya.

QODOBKA 22aad

QAYBAHA AKADEMIYADA CILMIGA FANKA IYO SUUGAANTA

Qaybaha ay ka kooban tahay Akademiyad Cilmiga, Fanka iyo Suugaanta waxay ku sheegan yihiin lifaaqa ku xiran xeerkaan.

QODOBKA 23aad

DHAQAN GELID

Xeerkan wuxuu dhaqan galayaa maalinta lagu soo saaro faafinta rasmiga ah.

Muqdisho 17 Febraayo 1979

Jaalle Axmed Ashkir Bootaan,
Wasiirka Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

Jaalle Maxamed Yuusuf Weyrax
Wasiirka Maaliyadda.

Jaalle S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga

Soomaaiya, ahna Xoghayaha Guud ee XHKS.

Waan aragnay ee Diiwaangelinay Diiwaanka lam. 1 Bogga lam. 109 Muqdisho 17 Luulyo 1979 Hantidhawraha Guud KMG

Yuusuf Cali Nuur

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR
GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR

Markuu: Arkay waxey ku saabsan tahay iyo ogeeysiiska ban-
Haddii uu arkay dacwadda kor ku qoran;
giga;—————————
Hadduu: Arkay qod. 69. D. L. 9/9/65 N. 2 lumid Buug Keydka lam. yahay 11.294 kuna qoran lacag dhan Sh So. 222/= Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaali Laanta 2aad.

WUXUU AMRAYAA

In loo cusbooneysiiyo Buug Keydka ka dib markii ay ka soo wareegto 30 maalmood maalinta dekeretada lagu shaaciyo faafinta rasmiga ah ee dawladda.

WAXA LA CODSANAYAA

In buugga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro Muriidi Sh. Cali Xaaji Iikar, ama qof isla asaga ka sita wakaalad sharci ah, ayadoo la sugaayo mudda 30 maalmood ah ee aan kor ku soo sheegnay.

Muqdisho, 11.2.79.

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR
(Gr. CABDULLAAHI MAXAMED MAAX)

L. 196

KANDALA — INDUSTRIE SOMALE CONSERVIFICI & PESCA Saldhigga: MUQDISHO — Raasumaal Shs. So. 2.000.000
ISKU YEERID FADHI CAADI AH IYO MID AAN CAADI AHEYN

Sahmi qabayaaska Sharikadda KANDALA Industrie Somali Conservifici e Pesca — S. P. A. — waxaa la isugu yeeray shirka caadi ah iyo mid aan caadi aheyn ee lagu qaban doono Muqdisho Xafiiska Wasaaradda Kalluunka dhaxdooda, maalinta 18.6.1979 saacaddu markay tahay 10 subaxnimo fadhiga ugu horreeya, haddii fadhigaas suura galiwaayo, waxaa mar labaad laisugu iman doona maalinta 19. 6. 1979 isla saacadda kor lagu soo sheegay, si go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA DOODA

FADHIGA AAN CAADIGA AHEYN:

1) Waxaa la baddalayaa magaca Sharikadda;
2) Oggolaansha Sharciga dhismaha Sharikadda. (Statuto).

FADHIGA CAADIGA AH:

1) Magacaabidda Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarayaasha.

GUDDIGA MAAMULKA

L. 197

KANDALA — INDUSTRIE SOMALE CONSERVIFICI & PESCA

Società per Azioni — Sede sociale in Mogadiscio Capitale sociale versato Shs. So. 2.000.000.

AVVISO DI CONVOCAKIONE DI ASSEMBLEA STAORDINARIA E ORDINARIA.

Cli Azionisti della società per azioni «KANDALA» Industrie Somale Conservifici & Pesca, sono convocati in Assemblea Straordinaria ed Ordinaria in Mogadiscio, presso gli Uffici del Ministero della Pesca, il giorno 18 Giugno 1979 alle ore 10 in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazinoe il giorno 19 Giugno 1979 alla stessa ora ed nello stesso luogo, per discutere e deliberare sul seguente.

ORDINE DEL GIORNO

1) Modifica della denominazione della Società.
2) Approvazione del nuovo Statuto Sociale.

Parte Ordinaria:

1) Momina del Consiglio di Amministrazione e del Collegio Sindacale.

IL CONSIGLIO DI AMMINSTARAZIONE

L. 198

SHIRKADDA KOJU,

Ogeeysiis isugu yeerid shir caadi ah

Waxaa dhammaan laysugu yeerayaa Saamileyda ku jirta Shirkadda Koju, in ay ka soo qaybgalaan Shirka lagu qabandoono Xarunta Shirkadda Koju ee Kismaayo maalinta bisha Luulyo tahay 25.7.79, saacadduna tahay 8 fidnimo Shirka hore, haddii ay suura gal noqonweydo kan labaad wuxuu noqondoona 30 Luulyo 79, isla saacadda kor ku xusan.

Arrimaha laga doodi doono;

1. Oggolaansho Miisaaniyadda 1977 — 1978,

2. Doorashada Guddiga Maamulka Shirkadda,

2. Doorashada Guddiga Baarista

4. Wixii ka dhasha fadhiga

Kismaayo 20 Maarso 1979

G/Ku xigeenka
Xaaji Cabdi Yare

SHIRKADDA «MORODI» — S. P. A.
Saldhigga: MUQDISHO — J. D. Soomaaliya
Raasumaal Shs. So. 2.000.000

ISKU YEERID FADHI CAADI AH IYO MID AAN CAADI AHEYN

Saamilayda Shirkadda MORODI — S. P. A. waxaa la isugu yeeray shirar caadi ah iyo mid aan caadi aheyn ee lagu qaban doono Muqdisho, Xafiiska Shirkada SO. N.A.S. maalinta 11.6.79 saacaddu markay tahay 10 subaxnimo fadhiga ugu horreeya. haddii fdhigaas suur galiwaayo, waxaa mar labaad la isugu imaan doonaa maalinta 18.6.1979 isla saacadda iyo isla meesha kor lagu soo sheegay, sii go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA DOODA

Fadhiga Caadiga ah:

1) Miisaanniyadda iyo Kharajka iyo Dakhliga ilaas 31 Diseembar 1978 iyo go'aannada la xarriira.

1) Raiga iyo qaraarka la xirriira ku daridda Shirkadda la yiraahdo SO. N. A. S. (fusione per incorporazione) taasoo dhaqan geliysa 1da Jennaayo 1979. Maaliyadda So. N. A. S. waa 12.000.000 saldhigeeduna waa Muqdisho.

Xaq waxaa u leh in fadhiga ka soo qayb galaan, sahmilayaaska ku qoran buugga xubnaha Sharikadda shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la gabannayo, ama keeno waqtigaas gudihiisa sahmiyaashooda Saldhigga Sharikadda ee Muqdisho, amase Xafiiska SO. N. A. S. ee Muqdisho.

GUDDIGA MAAMULKA

L. 199

SOCIETA' PER AZIONI «MORODI' — SEDE IN MOGADISCIO
Capitale sociale inter. vesato Shs. So 2.000.000

AVVISO DI CONVOCAZIONE ASSEMBLEA

Cli Azionisti della società per azioni MORODI» sono convocati in Assemblea Ordinaria e Straordinaria in Mogadiscio, presso lo' Ufficio della Spett le SO. N. A. S. per il giorno 11 Giugno 1979 alle ore 10 in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione per il giorno 18 giugno 1979 alla stesa ora e nello stesso luogo per discutere e deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

Parte Ordinaria:

Presentazione bilancio chiuso al 31 decembre 1978 e deliberazioni relative.

Parte Straordinaria:

Proposta di fusione per incorporazione, con effetto dal 1 Gennaio 1979, della Società «MORODI» nell Società per Azioni per Azioni So. N. A. S. con sede in Mogadiscio, capitale sociale Shs. So. 12.000.000, delibere relative e conseguenziali.

Avranno diritto di partecipare all Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l' Assem blea o che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle loro azioni presso la sede sociale in Mogadiscio, oppure presso gli Uffici della SO. N. A. S. — S.P.A in Mogadiscio.

IL CONSICLIO DI AMMINSTRAZIONE

HABO — TONNARA DI HABO — Società per Azioni
Saldhigga: MUQDISHO — Raasumaal Shs. So. 1.000.000

OGEEYSIIS-ISUYEERID FADHI CAADI AH

Sahmi qabyaaska Sharikadda HABO — Tonnara di Habo S.P.A. waxaa la isugu yeeray shirka caadiga ah ee lagu qaban doono Muqdisho, Xafiiska Wasaaradda Kalluunka dhaxdooda, maalinta 18.6.1979 saacaddu markay tahay 11 subaxnimo fadhiga ugu horreeya, haddii fadhigaas suura galiwaayo, waxaa mar labaad la isugu imaan doonaa maalinta 19.6.1979 isla saacadda kor lagu soo sheegay, sii go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA DOODA

1) Magacaabidda Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarayaasha.

GUDDIGA MAAMULKA

L. 199/BIS

HABO — TONNARA DI HABO — Società per Azioni
Sede: MOGADISCIO — Capitale sociale Shs. So 1.000.000

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Società per Azioni HABO — Tonnara di Habo sono convocati in Assemblea Ordinaria in Mogadiscio, presso gli Uffici del Ministero della Pesca, il giorno 18 Giugno 1979, alle ore 11, in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione il giorno 19 Giugno 1979, alla stessa ora e nello stesso luogo, per discutere e deliberare sul seguente

ORDINE DEL GIORNO

1) Momina del Consiglio di Amministrazione e del Collegio Sindacale.

IL CONSIGLIO DI AMMINSTRAZIONE